



6313

ANSHAXA ARDAYGA

LA ANSIXIYAY

July 25, 2025DIB LOO EEGAY:

KORMEERIDA

Dib u eegista: Si sanadle ah

Anshax Dugsi kasta oo charter-ka la ansixiyay ah waa inuu qaataa xeerka/ sharciga anshaxa ardayga oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn:

- (1) Tallaabooyinka edbinta ee loo dhaqangeliyay qaab kaas oo:¹
 - a. Isku-dheellitirtaa isla-xisaabtanka oo leh fahamka hab-dhaqanka ka dhashay jahawareerka;
 - b. Bartaa xeerarka dugsiga iyo fasalka iyadoo xoojinaysa in dhaqanka rabshada ama xadgudubka aan laga ogolayn dugsiga;
 - c. Yaraysaa carqaladaynta waxbarashada iyada oo xoogga saaraysa taageerada habdhaqanka togan iyo qorshayaasha faragelinta dabeecada;
 - d. Samaysaa xeerar iyo cawaaqibyo joogto ah; iyo
 - e. Qaabaysaa xidhiidho ixtiraam leh, aan xadgudub lahayn.
- (2) Si loo xaqiijiyo in yoolalkaas lagu guulaysto, dugsigu waa in uu adeegsadaa dhaqamada anshaxa wargelinta jahawareerka, sida:
 - i. Dhaqannada dib u dawaynta waxyeelooyinka;
 - ii. RTI²B;
 - iii. Nidaamyada taageerada ee heerarka badan; iyo
 - iv. Qorshayaasha faragelinta dabeecadda.
- (3) Nooca hab-dhaqanka laga filayo arday kasta, cawaaqibka ka dhalanaya ku guuldarraysiga u hoggaansanaanta xeerka, iyo muhiimadda uu xeerka u leeyahay ilaalinta jawi waxbarasho oo ammaan ah.

Xeerka dugsigu, ugu yaraan, waa in uu wax ka qabato: ²

- a. Luuqadda ay isticmaalaan ardayda;
- b. Ixtiraamka shaqaalaha dugsiga;
- c. Dagaalka, hanjabaada, xoogsheegashada, xoogsheegashada interneedka, iyo duleysiga ardayda;
- d. Ku haysashada hubka dhismaha dugsiga ama barta hawlaha dugsiga;
- e. Gudbinta ee qalabka elegtarooniga ah ee isgaarsiin kasta ee wata khatar la aamini karo oo dhaawac jireed ama dhimasho u geysanaysa arday kale ama



TENNESSEE

PUBLIC CHARTER SCHOOL COMMISSION

shaqaale dugsii;

- f. Waxyeelada loo geysto hantida ama qofka kale;
- g. Si xun u isticmaalka ama burburinta hantida dugsiga;
- h. libinta, qaybinta, isticmaalka, ama saamayn ku yeelashada maandooriyaha, khamriga, ama agabka daroogada lagu isticmaalo;
- i. Caasinimada, rabshada, aflagaadada, aan la xakameyn karin, ama qaska ardayga ee

hantida dugsiga, hab-dhaqanka fasalada, iyo hab-dhaqanka basaska dugsiga;

- j. Iyo mowduucyada kale ee uu dugsigu dooran karo in lagu daro, oo ay ku jiraan sababaha la ogolyahay ee ka joojinta ee uu dhigayo sharciga gobolka sida:³
- k. Ku xadgudubka joogtada ah iyo badheedhka ah ee xeerarka dugsiga;
- l. Dhaqan ah akhlaaq xumo iyo ixtiraam daro ama luuqad ah af-xumo ama caay;
- m. Rabshada ama xadgudubka hanjabaada ah ee ka dhanka ah qofka ee shaqaale kasta oo ka qaybgalaya ama lagu qoray dugsii kasta;
- n. Waxyeelo xaasidnimo ama badheedh ah oo loo geysto hantida dhabta ah ama shakhsi ahaaneed ee dugsiga, ama hantida qof kasta oo ka qayb galaya ama lagu meeleeeyay dugsiga;
- o. Kicinta, talo siinta, ama la-talinta kuwa kale si ay ugu lug yeeshaan mid ka mid ah falalkan;
- p. Calaamadaynta, halaynta, ama burburinta hantida dugsiga;
- q. Ku haysashada bastoolad, qori, ama hub hantida dugsiga;
- r. Ku haysashada mindi ama hub kale sida lagu qeexay T.C.A. § 39-17-1301 gudaha hantida dugsiga;
- s. Si xadgudub leh ugu weerarida hogaamiye dugsii, macalin, darawalka baska dugsiga, ama shaqaalaha kale ee dugsiga luuqad cay ah, fisqinimo, ama hanjabaad ah;
- t. Isticmaalka sharci darrada ah ama haysashada daroogada hurdada keenta ama daroogada la ansixiyay sida lagu qeexay T.C.A. § 53-10-101;
- u. Hal (1) ama arday badan oo ku bilaabaya weerar jidheed arday shakhsi ah oo ku sugan hantida dugsiga ama hawlaha la xidhiidha dugsiga, oo ay ku jiraan u socdaalida iyo ka soo noqoshada dugsiga ama hawlaha la xidhiidha dugsiga;
- v. Samaynta hanjabaad, oo ay ku jirto warbixin been abuur ah, si loo isticmaalo bam, waxyaabaha qarxa, ama wax kasta oo qarx dhimasho keena ama qalab wax dumiya, oo ay ku jiraan hubka kiimikada, oo lagu haysto hantida dugsiga ama dhacdada dugsigu maalgeliyay;
- w. Dhaqan kasta oo kale oo wax u dhimaya nidaamka wanaagsan ama anshaxa



TENNESSEE

PUBLIC CHARTER SCHOOL COMMISSION

ee dugsii kasta oo dadweyne; iyo

- x. Dhaqan-dembiyeedka ka baxsan xerada taasoo keenta in ardayga si sharci ah loogu soo oogo dembi kaas oo loo kala saari doono dembi wayn haddii ardayga loogu xukumay dambi qof wayn ahaan ama haddii loogu xukumay qof yar ahaan kaas oo loo aqoonsan doono inuu yahay dembi wayn haddii ardaygu yahay qof weyn, ama haddii ardayga lagu xukumay dambi, oo joogitaanka ardayga ee dugsiga ay u keenayso khatar dadka ama hantida ama carqaladeeya nidaamkawaxbarashada ah.
- (4) Xeerka noocaas ahi waa inuu hubiyaa deegaan waxbarasho oo badbaado iyo ammaan ah oo ka xor ah daroogooyinka, qalabka lagu isticmaalo daroogooyinka, rabshadaha, iyo hubka halista ah, oo ku soo rogaya cunaqabatayn degdeg ah, gaar ah, iyo edbin adag arday kasta:
- a. Kaas oo u keena daroogo, qalabka daroogada lagu isticmaalo, ama hub khatar ah baska dugsiga, soo geliya hantida dugsiga, ama dhacdo kasta ama hawlo la xidhiidha dugsiga;
 - b. Kaas oo, marka uu saaran yahay baska dugsiga, ku jiro hantida dugsiga, ama marka uu ka qayb galayo dhacdo kasta oo la xidhiidha dugsiga ama hawlo ay saamayn ku leedahay daroogada, haysto daroogo, qalabka daroogada lagu isticmaalo, ama hub khatar ah, ama weeraro ama ugu hanjabo inuu weerarayo macalin, arday , ama qof kale; ama
 - c. Kaas oo soo gudbiya qalab elektiroonig ah isgaarsiin kasta oo ay ku jirto khatar la aamini karo oo u geysata dhaawac jireed ama dhimasho arday kale ama shaqaale dugsii iyo gudbinta khatarta noocaas ah oo ku abuurayso dugsiga howlo carqaladayn dhab ah taas oo u baahan faragelin maamul.
- (5) Liiska dembiyada loo qoondeeyay inay yihiin dembiyo aan loo dulqaadan karin (ee waafaqsan Xeerka LEA ee Gudiga 6309);
- (6) Habraacyada nidaamka cadaaladda leh marka ardayga laga joojiyo ama loo cayriyo sababo la xidhiidha xeerka anshaxa ardayga/ ku xadgudubka xeerka habdhaqanka, oo ay ku jirto sharraxaadda nidaamka rafcaanka ee dugsigu uu u isticmaali doono ardayda wajaheysa cayrinta (iyadoo la raacayo xeerarka LEA ee 6316 iyo 6317);
- (7) Bayaan sheegaya in macalinka, maamulaha, shaqaalaha dugsiga, ama darawalka baska dugsigu laga yaabo inuu isticmaalo xoog macquul ah si waafaqsan sharciga gobolka;
- (8) Bayaan kaas oo, haddii, sababo la xidhiidha baadhitaan, hogaamiye dugsii ama qofka u wakiishay/ wakiilatay ay ogaadaan in arday ku kacay is-difaacid iyadoo la aaminsan yahay si macquul ah in ardayga ama mid kale kaas oo ardaygu uu ugu imanayo difaaca



TENNESSEE

PUBLIC CHARTER SCHOOL COMMISSION

ay la kulmayeen khatar dhow oo dhimasho ama dhaawac halis ah, markaas ardaygu ma wajihi karo wax tallaabo edbin ah;

- (9) Sharaxaad ku saabsan sida dugsigu uu uga ilaalin doono xuquuqda ardayda qabta naafanimada falalka edbinta iyo dacwadaha; iyo
- (10) Bayaan kaas oo ah in sharciga/ xeerka anshaxa lagu soo boosti garayn doono mareegaha dugsiga, iyo in nuqul la siin doono dhammaan la-taliyayaasha dugsiga, macallimiinta, shaqaalaha maamulka, ardayda, iyo waalidiinta si sanadle ah.⁴
- (11) Sharaxaad ku saabsan hirgelinta barnaamij kasta oo dhamaystiran oo ah xoojinta habdhaqanka togan iyo hababka wax ka beddelka nidaamyada ku salaysan abaalmarinta.⁵

Ardayda qabta naafanimada Dugsiyada charter-ka la ansixiyay waa inay xaqiijiyaan in dhammaan shuruudaha sharciyada gobolka iyo federaalka (oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn sharciga waxbarashada Shakhshiyaadka Naafanimada qabo iyo Qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973), shuruucda iyo xeerarka la raaco marka la edbinaayo ardayda qabta naafanimada.

Ciqaabta jir ahaaneed ee daran. Ciqaabta jidh ahaaneed ee daran waa in aan loo isticmaalin tilaabo edbin ahaan ah dugsi kasta.⁶

Raritaanka Badbaado leh oo Ardayda. Dugsigu waa inuu dejiyaa xeer ku saabsan raritaanka badbaadada leh ee ardayda. Xeerku waa inuu raacdaa shuruudaha ugu yar ee lagu sheegay sharciga gobolka.⁷

Xeerka Anshaxa Macalinka. ⁸ Dugsigu waa in uu qaataa xeer dejinaayo awoodda macalinka ee la xidhiidha maamulka fasalka, oo ay ku jirto anshaxa iyo ka saarida ardayda fasallada. Xeerku waa inuu ku jiraa habka rafcaanka ee macallimiinta codsiyadooda la diiday.

La Wareegida Aaladaha Isgaarsiinta Wireless-ka. ⁹ Dugsiyada charter-ka ee la ansixiyay ayaa laga yaabaa inay

dejiyaan xeer u oggolaanaya macalinka inuu ka haysto aalada isgaarsiinta wireless-ka inta lagu jiro wakhtiga waxbarashada haddii ardaygu uu ku guuldareysto u hoggaansanaanta xeerka aalada isgaarsiinta wireless-ka ee dugsiga charter-ka ee la ansixiyay. Dugsiga charter-ka ah ee la ansixiyay oo dejiya xeer hoos yimaada qaybtan waa in uu siiyaa ogeysiis Guddiga.

Dugsiyada Beddelaada ah. ¹⁰ Ku meelaynta barnaamij beddelaad ah waa in loo go'aamiyaa si kiis ilaa kiis ku salaysan, loo qoondeeyaa ardayda sida weyn u carqaladeeya nidaamka waxbarashada, waana in la tixgeliyaa saameynta ay ku leedahay dhaqamada edbinta ka-saarista ardayda. Barnaamijyada dugsi beddelaad ah waa inay u hoggaansamaan dhammaan sharciyada gobolka iyo federaalka, shuruucda, iyo xeerarka, oo ay ku jiraan dhammaan sharciyada gobolka iyo federaalka ee la xiriira waxbarashada gaarka ah haddii ardaygu leeyahay Barnaamij Waxbarasho La Gaaryeelay (IEP), qorshaha 504, ama haddii ardayga laga shakiyo inuu qabo



naafanimo. Waxbarashadu waa inay u socotaa sida ugu dhow ee suurtoogalka ah iyadoo la raacayo barnaamijyada waxbarida ee dugsiga guriga ardayga. Ka hor ku meelaynta ardayga barnaamij beddelaad ah oo dugsi ah, hogaamiyaha dugsigu waa inuu siiyaa ogeysiis qoraal ah waalidka/masuulka ardayga oo sheegaya sababta meelaynta **ardayga**.

Imaanshaha ardayga dib loogu celiyay dugsi beddelaad ah ayaa noqon doonta mid khasab ah inta lagu jiro dib ugu haynta dugsiga beddelaad ah. Dugsigu waa inuu soo gudbiyaa imaanshaha dhammaan ardayda dib loogu celiyay dugsiga beddelaad ah. Dhammaan shaqada koorsada iyo dhibcaha lagu kasbado dugsiga beddelaad ah waa in loo wareejiyaa oo lagu diiwaangeliyaa dugsiga guriga ardayga, oo ardayda ka diiwaangashan dugsiyada beddelaad ah waa inay ka qaybqaataan dhammaan qiimaynaha gobolka ee loo baahan yahay. Horumarka tacliimeed ee arday kasta oo ku jira barnaamij waxbarasho oo beddelaad ah waa in la kormeero oo si joogto ah uu u qiimeeyo dugsiga charter-ka ah. Intaa waxaa dheer, hoggaamiyaha dugsiga ee dugsi kasta oo charter-ka la ansxiyay ah ama isaga/iyada loo xilsaaray waa inay la shaqeeyaan kormeeraha dugsiga beddelaad ah ee ardaygu dhigto si loo horumariyo oo loo dhaqangeliyo qorshooyinka isbeddelka rasmiga ah ee isdhexgalka ardayga ka socdo dugsiga dhexe ama sare ee galaya dugsiga beddelaada ah oona ka soo baxaya dugsiga beddelaad ah oo dib ugu soo laabanaya dugsiga dhexe ama sare. Qorshayaasha kala-guurka waa in loo beegsadaa si kor loogu qaado xidhiidhka ka dhexeeya dugsiga charter-ka ah iyo shaqaalaha dugsiga beddelaad ah ee dugsiga waana in wax laga qabto caqabado kasta oo ka mamnuuci kara ardayda inay si guul leh u gudbaan. Qorshayaasha kala-guurka waa in ay ku jiraan toosinta manhajka, taageerada waxbarashada iyo dhaqanka, dabagalka ardayda ku laabanaysa dugsigii hore, iyo horumarinta yoolalka qalin-jabinta iyo dugsiga sare kadib.

Tixraacyada Sharciga ah:

¹ T.C.A. § 49-6-4109

² T.C.A. § 49-6-4002

³ T.C.A. § 49-6-3401(a)-(b)

yahay iyo Ardayga

⁴ T.C.A. § 49-6-4007

⁵ T.C.A. § 49-6-4002

celinta

⁶ T.C.A. § 49-6-4103

Dulqaadan Karin

⁷ T.C.A. § 49-6-2802

⁸ T.C.A. § 49-6-2801, et. seq.

⁹ T.C.A. § 49-6-4002

¹⁰ T.C.A. § 49-6-3402; Xeerka Guddiga Gobolka

2.302 Tenn. Comp. R. & Regs. 0520-01-02-.09

Faahfaahinada Tixraacyada:

Xeerka LEA 1801 Waxbarashada Gaarka ah

Xeerka LEA 1802 ADA iyo Qaybta 504

Xeerka LEA 6317 Dib u celinta Loo Baahan

Maamulka Anshaxa

Xeerka LEA 6316 ka joojinta/Cayrinta/Dib ugu

Xeerka LEA 6309 ee Dambiga aan Loo